GOLAHA SHACABKA FEDERAALKA KMG AH EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYEED

XEER HOOSAADKA

GOLAHA SHACABKA FEDERAALKA KMG

HORDHAC: -

Golaha Shacabka Federaalka KMG ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed:

Kaddib markuu arkay: Qoddobka 33 aad Faqradda f ee Axdiga.

Markuu tixgeliyay:- In loo baahan yahay in Golaha Shacabka Federaalka KMG ah loo sameeyo xeer hoosaad uu ku shaqeeyo.

Markuu garawsaday:- In xilka iyo waajibaadka Qarameed ee horyaal Golaha ay yihiin kuwo aad u balaaran oo culus.

Wuxuu gudoonsaday:- In la ansaxiyo, laguna dhaqmo xeer hoosaadkan.

QODOBKA

1AAD.

GOLAHA SHACABKA KMG AH:

1. Golaha Shacabka Federaalka KMG ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed waa wakiilka shacbiga, waana awoodda ugu sareysa ee sharci dajinta Dalka, wuxuuna ka kooban yahay 275 xubnood, oo ay ugu yaraan boqolkii 12 (12%) yihiin dumar.

2. Afafka looga hadlayo Golaha waa Af-Soomaali (May iyo Maxaa Tiri) iyo Carabi.

3. Xarunta Goluhu waa Magaala - madaxda Dalka Muqdisho.

4. Baarlamanku wuxuu awood u leeyahay inuu qaar ka mid ah fadhiyadiisa ku qabsado meel ka baxsan Xaruntiisa, marka uu sidaas go’aansado.

5. Mudada Goluhu waa 5 sano oo laga bilaabayo maalinta la dhaariyo xildhibaanada ugu horeeya ee ka tirsan Golaha Shacabka KMG ah (22/08/2004).

QOD. 2AAD:

WAAJIBAADKA GOLAHA SHACABKA KMG AH:

Waajibaadka Golaha Shacabka Federaalka KMG ah waa sidatan:

1. Goluhu wuxuu u xilsaaran yahay dejinta, hubinta, dhawrista shuruucda Dalka iyo la xisaabtanka xukuumadda iyo Hayadaheeda.

2. Doorashada Guddoomiyaha Golaha Shacabka KMG ah iyo kuxigeenaddiisa(!aad/2aad).

3. Doorashada Maddaxweynaha KMG ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

4. Dejinta xeer hoosaadka Golaha .

5. Ansaxinta miisaaniyad sanadeedka iyo xisaabxirkeeda.

6. Kalsoonisiinta xukuumadda, u diididda ama kala noqashada kalsoonida.

7. Magacaabidda Guddiyo baara Hay'adaha Dawladda markii loo baahdo.

8. Ansaxinta heshiisyadda caalamiga ah iyo heshiisyaddalaba geesoodka ah (Bileteral Agreements), oo ay xukuumaddu la gasho dawladaha kale.

9. Ansaxinta sharciyada ay soo gudbiso xukuumaddu ama ay keenaan xildhibaanadu.

10. Ansaxinta go'aanka xukuumadda ee Xaaladda Degdegga ah (State of Emergency).

QOD. 3AAD:

DHAARTA XILDHIBAANADA:

Xubbin kasta oo ka mid ah xildhibaanada Golaha Shacabka Federaalka ee KMG Jamhuuriyadda Soomaaliyeed ka hor intuusan/intaysan qaban xilka wuxuu marayaa/waxay maraysaa dhaarta hoos ku qoran:-

> *“Waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahay inaan u guto xilkayga si daacad ah, oo ay ku jirto danta dadka iyo dalka, dhawrana Axdiga iyo shuruucda Dalka."*

QOD. 4AAD:

KALFADHIYADA GOLAHA SHACABKA KMG AH:

1. Barlamaanku wuxuu yeelanayaa laba kalfadhi oo caadi ah sanadkiiba, kalfadhi kasta wuxuu soconayaa muddo ah afar bilood.

b) Kalfadhiga koowaad 13/8 ilaa 12/12.

t) Kalfadhiga labaad 13/2 ilaa 12/6.

2. Baarlamaanku wuxuu yeelan karaa kalfadhiyo aan caadi ahayn.

3. Kalfadhiyada caadiga ah ama aan caadiga ahayn ee Goluhu waxay soconayaan ilaa ay ka dhamaanayaan ajendooyinka la soo hordhigay, oo ay ka mid ahaan karaan hindisayaasha sharciyeed ee sida degdegga ah ku yimaada.

QOD. 5AAD

KALFADHIYADA AAN CAADIGA AHAYN EE GOLAHA:

1. Kalfadhiyadda aan caadiga ahayn ee Golaha Shacabka KMG ah waxaa soo jeedin kara.

b) Guddoomiyaha Golaha.

t) Maddaxweynaha KMG ah ee Jamhuuriyadda.

j) Xukuumadda

x) Codsi Xildhibaano Golaha oo tiradoodu gaarayso 1/3.

QOD. 6AAD:

GUDDOONKA KMG EE GOLAHA SHACABKA KMG AH:

Fadhiga u horeeya ee Golaha Shacabka KMG ah inta laga dooranayo Guddoomiyaha Golaha ee rasmiga ah, waxaa si ku meel gaar ah u sii gudoominaya xildhibaanka ugu da'da weyn xubnaha Golaha, sida ku xusan qodobka 32 Faqrada 3 ee Axdiga Qaranka ee KMG.

QOD. 7AAD:

TIRADA GUNTANKA (QUORUM)

ANSAXIDDA KALFADHIYADA GOLAHA:

1. Fadhiga ugu horeeya ee furitaanka kalfadhi kasta wuxuu ku ansixi karaa marka ay joogaan guntan (quorum) gaaraya 2/3 ee xubnaha Golaha Shacabka KMG ah.

2. Mar hadii uu furmo kalfadhigu, fadhiyada kale ee Goluhu, waxay ku ansaxayaan guntan (Quorum) ah 50% + 1 xubnaha Golaha.

3. Hadii ay timaado xaalad u baahan cod ah aqlabiyad 2/3 markaas waxaa lagama maarmaan ah in ay joogaan xubno gaaraya 184.

QOD. 8AAD:

QAABKA LOO DOORANAYO GUDDOOMIYAHA

GOLAHA IYO KU XIGEENADIISA (1aad /2aad):

1. Musharaxiinta doonaya in loo doorto xilalka Gudoomiyaha iyo Gudoomiye ku xigeenada waa inay yihiin xildhibaano ka tirsan Golaha.

2. Waa in ay soo gudbiyaan mid kasta, codsi qoraal ah oo ay la socdaan laba sawir, waana inay codsigooda ku soo lifaaqaan taariikh nololeedkooda oo kooban (C.V.).

3. Musharax kasta wuxuu codsigiisa ku soo qeexayaa jagada uu u tartamayo, hadday tahay tan Guddoomiyaha ama tan Guddoomiye kuxigeenada (1aad/ 2aad).

QOD. 9AAD:

HANAANKA CODAYNTA EE DOORASHADA

GUDOOMIYAHA GOLAHA IYO KUXIGEENADDIISA

(1aad iyo 2aad):

1. Codayntu waa qarsoodi, xildhibaan kasta wuxuu warqadda uu ku soo codeeyey ku ridayaa sanduuq faaruq ah oo dusha ka jeexan, gudihiisuna muuqdo.

2. Codayntu waxay noqonaysaa saddex wareeg.

b) Wareega 1aad, musharaxii hela (2/3), ee tirada Codadka xildhibaanadda oo ah 184, ayaa ku guulaysanaya doorashada. Hadii la waayo Musharax hela tiradaa waxaa loo gudbayaa wareega 2aad.

t) Wareega 2aad waxaa ka qayb gelaya afarta Musharax ee hela tirada cododka ugu badan ee wareega 1aad, hadddii ay jiraan musharaxiin helay cod is leg oo bar bar dhac ah, waa ka wada qaybgalayaan wareega labaad, oo tiradda tartamayaasha ayaa korhdaysa. Musharaxii ku guulaysta (2/3) tirada codadka guud ee barlmaanka ayaa ku guulaysanaya jagada, hadii la waayo waxaa loo gudbayaa wareega 3aad.

j) Wareega 3aad waxaa ka qayb galaya labada Musharax ee ugu codad bata wareega 2aad. haddii uu jiro musharax saddexaad oo helay tiro la siman

mid ka mid ah labada musharax ee isku soo haray ,wuu ka qayb galayaa isaguna wareega saddexaad waxaa doorashada ku guulaysanaya musharaxii hela cod hal dheeri ah ee tiradda xubnaha Golaha..

x) Haddiii ay dhacdo in wareeega koowad kadib ay isku soo haraan laba musharax oo qura sababtuna ay tahay taanasulid ay ka tanaasuleen tartanka musharaxiintii kale, waxaa si toos ah loogu gudbayaa wareega sadexaad ee ku xusan xarafka (j) ee isla qobobkan , waxaana markaa meesha ka baxaya wareega labaad ee ku xusan xarafka (t) ee isla qodobkan. labada musharax ee isku soo hartay waxay ku kala guulaysanayaan cod hal dheeri ah ee tirada Xubnaha Golaha.

3. Markey codayntu dhamaato waxaa gudoomiyaha KMG furayaa sanaadiiqda codaynta, waxaana la tiranayaa codadka, kadibna waxaa gudoomiyaha KMG ah ku dhawaaqayaa cidii ku guulaysatay jagada Gudoomiyaha Golaha.

4. U codaynta kuxigeenada waxaa maamulaya Gudoomihaya la doortay isgoo raacaya habka doorashada ee ku tilmaaman faqrada sadexaad ee isla qodobkan.

QOD 10 AAD

XAFIISKA GOLAHA SHACBIGA EE KMG AH :

Golaha Shacabka wuxuu yeelanayaa xafiis u xilsaaran maamulka kaa soo ka koobnaanaya:

1. Gudoomiyaha Golaha
2. Gudoomooye kuxigeenka koowaad
3. Gudoomiye kuxigenka labaad
4. Habdhowraha iyo labada habdhowre kuxigeen
5. Saddex xoghaye
6. Agaasimaha Guud ee Golaha Shacabka KMG ah
7. Habdhowraha, ku-xigeenadiisa iyo xoghayayaasha waxay ka mid yihiin Golaha, waxaana soo magacaabaya Gudoomiyaha isagoo la tashanaya ku-xigeenadiisa kadibna waxaa ansixinaya Golaha, wuxuuna ku meel marinayaa cod hal dheeri ah, tiraada xubnaha fadhiya .

QOD. 11AAD:

XILKA GUDOOMIYAHA

GOLAHA SHACABKA KMG AH:

1. Gudoomiyuhu wuxuu ku dhawaaqayaa natiijada Doorashada Madaxweynaha Federaalka ee Jamhuuriyadda Soomaaliya.

2. Gudoomiyaha Barlamaanku wuxuu mas'uul ka yahay fulinta iyo dhawrista Xeer hoosaadka, ilaalinta nidaamka Golaha, wuxuuna ilaananayaa habsami u socodka hawlaha Golaha sida sharci dajinta, maamulka iyo hab maamuuska.

3. Gudoomiyuhu wuxuu furayaa, xirayaana fadhiyada wuxuu sheegayaa saacadaha iyo ajandaha fadhiga soo socda oo qoraal ahaan lagu wargelinayo Golaha Shacabka KMG ah.

4. Gudoomiyuhu wuxuu hadalka u qaybinayaa xildhibaanada, wuxuuna hoggminyaa dooda, wuxuu soo jeedinayaa su'aalaha, wuxuuna nidaamiyaa habka codaynta, wuxuuna ku dhawaaqaa natiijadooda.

5. Wuxuu kormeeraa shaqada harbdhowrayaasha iyo xoghayayaasha.

6. Gudoomiyuhu wuxuu matalaa, kuna hadlaa magaca Golaha Shacabka KMG ah.

7. Wuxuu xiriiriyaa Golaha iyo Barlamaanada aduunka.

8. Wuxuu saxiixaa heshiisyada caalamiga ah ee Goluhu la gelayo Barlamaanada aduunka.

9. Gudoomiyaha, Ku Xigeenaddisa iyo Xubnaha Xafiiska Golaha Shacabka KMG ah waxay kala qaybgalyaan Gudiyadda Golaha dejinta ajendada hawlaha Golaha ee kalfadhiyada caadiga ah.

QOD. 12AAD:

XILKA GUDOOMIYE KUXIGEENADA

GOLAHA SHACABKA KMG AH.

1. Gudoomiyaha Barlamaaanku marka uu maqan yahay ama aanu qaban karin xilkiisa, sabab kasta ha ahaatee, waxaa dhamaan howshiisi fulinya Gudoomiye ku xigenka kowwad, haddii isna maqnaado waxaa howsha gudoominta qabanaya Gudoomiye ku xigeenka labad ee Golaha Shacabka KMG ah.

2. Gudoomiye kuxigeenka koowaad iyo kan labaad ee Barlamaanku waxay kale oo ay qabanayaan howl kasta oo uu guddoomiyuhu u xil saaro, wad jir ama kali kali.

3. Haddii ay Guddoomiayah iyo labadiisa Ku Xigeen maqnaadaan wuxuu Goluhu

iska dhex dooranayaa Shir Guddoomiye KMG ah.

QOD. 13AAD:

XILWAAYIDA GUDOOMIYAHA

GOLAHA IYO KUXIGEENADIISA:

1. Gudoomiyaha Golaha ama kuxigeenadiisu waxay xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda:-

   b) Geeri .

   t) Istiqaalo qoraal ah.

   j) Maqnaasho cudurdaar la'aan ah oo gaaraysa labo bilood.

   kh) xil gudsho la'aan joogto ah:-

   Dhimirkiisa oo ay wax u dhinmaan (waali), taasoo loo baahanyahay inuu soo caddeeyo guddi dhakhaatiir ah oo la aqoonsan yahay

   Caafimaad daro joogto ah ama awood beelid uusan xilka la gudan karin , taasoo loo bahan yahay inuu soo caddeeyo gudi dhakhaariir ah oo la aqoonsan yahay.

   d) Xukun ciqaabeed oo ka luminaya ahliyada maamulidda guud(Interdictable delicto), kaasoo loo baahan yahay inuu noqday kamadambays.

2. Markii ay Gudoomiyaha ama mid ka mid ah kuxigeenadiisu ay waayaan xilka waxaa lagu dooranayaa Gudoomiye cusub ama kuxigeen cusub muddo ah 30 beri gudahood.

3. Haddii waqtiga uu Gudoomiyaha Goluhu ama kuxigeenku waayay xilka uu ku soo aado waqti uu Barlamaanku ku jiro fasax, xubinta cusub ee gudoonka waxaa la dooranayaa kadib marka uu bilawdo kalfadhiga ugu horeeya .

QOD. 14AAD:

XILKA HABDHAWRAHA GOLAHA

IYO KUXIGEENADIISA:

Habdhowraha Golaha iyo kuxigeenadiisu iyagoo raacaya awaamIirta Gudoomiyaha waxay u xilsaaran yihiin: -

1. Dhawrista nidaamka Golaha.

2. Nabadgalyada iyo xasiloonida goobta iyo xubnaha Golaha.

3. Kormeerka iyo hubinta hawlaha gaadiidka ee xubnaha Golaha.

4. Dhawrista iyo xanaanada qalabka iyo hadiyadaha Golaha la siiyey.

5. Ilaalinta hab maamuuska, qaab fadhiga xubnaha Golaha iyo Martida.

6. Wixii kale ee Gudoomiyhu u xilsaaro.

QOD. 15AAD:

XILKA XOGHAYAYAASHA GOLAHA:

Xoghayayaasha Goluhu waxay u xilsaaran yihiin:- Ogaysiinta Xildhibaanada waqtiyada shirarka Golaha, oo qoraal lagu wargelinayo ayna ku lifaaqan tahay ajandada fadhigu, waa in Xildhibaanada lagu wargeliyo 24 saac ka hor, hadaan Gudoomiyuhu muujin xaalad degdeg ah.

1. Diiwaan gelinta codsiyada xildhibaanada doonaya in ay hadlaan.

2. Tirada codadka la bixiyay iyo arimaha kale ee Goluhu go'aan ka gaaray.

3. Akhrinta qoraalada la soo jeediyay, xaadarinta xildhibaanada iyo hubinta inaan wax laga badalin hadalada xildhibaanada.

4. Hubinta in dhamaan go'aanada goluhu soo saaray ay si sax ah u diiwaan galaan, uuna saxiixay xoghayaha shaqada wada, isagoo maxdarka qoraalada la saxiixaya Gudoomiyaha Golaha.

5. Shaqadii kale ee uu Gudoomiyuhu u xilsaaro.

QOD.16AAD:

WAAYIDDA XUBINIMADA GOLAHA

GOLAHA SHACABKA KMG AH:

Xubinimada Golaha waxaa lagu waayi karaa sida soo socota:-

1. Geeri .

2. Istiqaalo qoraal ah oo soo gaarta xafiiska Golaha.

3. Maqnaasho sabab la'aan oo gaaraysa hal kalfadhi, ama maqnaansho sabab la'aan oo teel teel ah gaaraysana muddo afar bilood ah, sanad gudihiis.

4. Xil gudasho la'aan joogto ah :-

Dhimirkiisa oo wax u dhinmaan (Waali), taasoo loo baahan yahay in ay soo cadeeyaan guddi dhaqaatiir ah oo la aqoonsan yahay.

Caafimaad darro joogto ah ama awood beelid uusan xilka la gudan karain taasoo uu soo caddeeyey guddi dhakhaatiir ah oo la aqoon sanyahay .

5. Xukun ciqaabeed oo kama dambays ah, ahna mid ka luminaya ahliyada maamulida guud (Interdictable delicto),

QOD.17AAD:

GUDIYADDA GOLAHA SHACABKA

KMG AH EE JOOGTADA AH:

1. Barlamaanku isagoo xilkiisa gudanaya, kormeerayana howlaha xukuumada wuxuu yeelanayaa Guddiyo joogto ah kuwaas oo ka koobnaan doona sida soo socota:-

b) Guddiga Dastuurka, Cadaalada iyo arrimaha fadaraalka .

t) Guddiga xiriirka caalamiga ah, arrimaha Gobolka , Jaaliyadaha iyo Qaxootiga Somaliyeed.

j) Guddiga Arrimaha Difaaca iyo Nabadgalyadda (Amniga).

x) Guddiga Arrimaha Dhaqaalaha, Maaliyadda iyo Ganacsiga .

kh)Guddiga Arrimaha Bulshada iyo dhowrista bii'adda.

c) Guddiga Arrimaha Xuquuqul-insaanka, Haweenka, Caruurta iyo Arimaha Qoyska.

r) Guddiga Warfaafinta.,Wacyi galinta iyo Hidaha & Dhaqanka .

s) Guddiga dib uheshiisiinta , Hub - kadhigista iyo Dhaqan celinta .

sh) Guddiga farsamadda , dib u dhiska iyo Dib u dejinta

dh) Guddiga Hubinta iyo Anshaxa.

2. Guddi kasta wuxuu iska dhex dooranayaa Guddoomiye, Guddoomiye kuxigeen, iyo xoghaye.

3. Guddi kasta wuxuu ka kooban yahay 9 xubnood, ha yeshee guddiyada ku xusan xarfaha (t iyo s) ee isla qodobkan waxay ka koobnaanayaan 15 xubnood midkasta, iyadoo guddi walba looga baahan yahay in ay ku jiraan xubno takhasus ku leh hawsha guddiga u xilsaaran yahay.

4. Guddiyada Golaha Shacabka KMG ah waxaa magacaabaya Guddoomiyaha Golaha kadib markuu latashado kuxigeenadiisa,waxaana laga ansixinayaa Golaha Shacabka KMG ah cod hal dheeri ah Xubnaha Fadhiya.

QOD. 18AAD:

GUDIYADA AAN JOOGTADA AHAYN:

(AD-HOC COMMITTEES):

Goluhu wuxuu magacaabi karaa marka loo baahan yahay Guddiyo gaar ah oo aan joogto ahayn, jirayana inta ay hawsha loo xilsaaray socoto.

QOD. 19AAD:

XILALKA GUDDI HAWLEEDYADA

JOOGTADA AH:

1. Lasocodka Maamulka iyo Hay'adaha xukuumadda oo ay guddi walba isku shaqada yihiin.

2. Waxaa Gudoomiyha Goluhu u gudbinayaa Gudiyada xeerarka quseeya howlahooda intaan la horkeenin Golaha.

3. Guddi kasta wuxuu samaysanayaa Barnaamijkiisa Shaqo.

4. Guddiyada joogtada ah waxay shaqaynayaan haddii loo baahdo mudada u dhaxeysa kalfadhiyada Golaha Shacabka KMG ah.

QOD. 20AAD:

GUDDIGA HUBINTA IYO ANSHAXA:

1. Guddiga hubinta iyo anshaxa waa in ay ugu yaraan ka mid noqdaan laba xildhibaan oo garyaqaano ah.

2. Guddiga hubinta iyo anshaxa wuxuu awood u leeyahay mudada jiritaanka Golaha in uu soo jeediyo wax kabedelka ama wax ku kordhinta xeer hoosaadka Golaha iyo fasiraada qodobada xeer hoosaadka.

3. Wuxuu u xilsaaran yahay in uu ku sameeyo daraasad xaaladda burin karta Xubinimada Xildhibaanka iyo wixii ka horimaanaya mas'uuliyada uu xambaarsan yahay xildhibaanku.

4. Wuxuu kaloo u xilsaaran yahay anshax marinta xildhibaanada.

5. Inuu kasoo talobixiyo markii la soo weydiisto Golaha in xildhibaan laga qaado xasaanadda si loo horgeeyo maxkamad.

QOD.21AAD:

XUQUUQDA IYO XASAANADA

GOLAHA SHACABKA KMG AH:

1- Xuquuqda iyo Xasaanada Xubnaha Golaha Shacabka KMG ah waa sida ku xusan qodobka 35 Axdi Qarameedka KMG ah.

2- Xuquuqda Gunnno ee Guddooonka, Xubnaha Gudiyada iyo xildhibaanada waxay ka bilaabanaysa maalinta loo dhariyo xilka, waxayna u kala baxaysaa:

Gunno bileed joogto ah

Gunno fadhi

Sahay safar

Faahfaahinta iyo qadarka gunnooyinkaa waxaa habaynaya xeergaar ah oo la soo saari doono.

3- Daawaynta Xildhibaanka iyo xubnaha qoyskiisa (waalidkiis, xaaskiisa iyo carurtiisa) waxaa damaanad qaaadaysa Dowladda

QOD. 22AAD:

NABEDGELYADDA GOOBTA SHIRKA:

1. Dhawrista nabadegelyadda Golaha waxaa u xilsaaran Guddoomiyaha Golaha oo markii loo baahdo amraya habdhowrayasha inay qaadaan talaabooyinka ku haboon, waxayna adeegsan karaan hawl wadeenada nabadgelyada.

2. Waxaa reeban in qofna hub la soo galo goobta shirka Golaha Shacabka KMG ah. qofkii hub la soo galana waxaa laga qaadayaa talaabo sharci ah.

3. Ciidamada Nabadgelyadu ma soo geli karaan goobta shirka Golaha Shacabka KMG ah haddaan Gudoomiyuhu dalbin.

4. Cid ka baxsan Xubnaha Golaha Shacabka KMG ah ma soo geli karto goobta shirka haddii aan loo ogolaan.

5. Xubnaha Golaha iyo goob joogayaashu waa inay damiyaan Moobilada (Teleefoonada iyo qalab kasta oo carqaladayn kara ismaqalka fadhiga Golaha, inta uu shirku soconayo).

QOD. 23AAD

DADKA LOO OGOLAADAY FADHIGA:

1. Dadka loo ogolaaday in ay dhagaystaan Doodaha waa inay aamusnaadaan, oo aysan muujin calaamooyin ogolaansho ama diidmo midna, habdhowraha iyo ku xigeenadiisu iyagoo fulinaya amarka Guddoomiyaha waxay si deg deg ah uga saarayaan goobta shirka dadka khilaafa nidaamka.

2. Dhagaystihii gaysta aflagaado wax u dhimaysa sharafta Golaha Shacabka KMG ah ama xubin ka mid ah Xildhibaanada isla markiiba waxaa lagu xirayaa amarka Guddoomiyaha, waxaaana lagu wareejinyaa ciidanka Booliiska si loo dhamaystiro dacwaddiisa .

QOD. 24AAD:

QAABKA DOODAHA IYO DHAWRISTA

HABSAMI USUCODKA FADHIGA:

1. Haddii Xildhibaan doodiisa ay ka muuqato ereyo ku xun asluubta ama dhaqdhaqaaqiisu uu dhibayo xoriyadda dooda iyo habsami usocodka fadhiga, Gudoomiyuhu wuxuu u soo jeedinayaa codsi ah inuu dhawro nidaamka.

2. Haddii Xildhibaanku ku qanci waayo codsiga, waxaa Guddoomiyahu u soo jeedinayaa canaan ku wajahan falalka uu sameynayo xildhibaanka la canaantay wuxuu soo jeedin karaa raali gelin uu ka bixinayo waxyaabihii lagu canaantay.

3. Haddii isla fadhigaas mar labaad isla xildhibaankii lagu canaanto ama uu ku kaco, waxyaabo ka sii xun kuwii uu horay u galay, Gudoomiyuhu fadhigu wuxuu ka joojinayaa hadalka, wuxuuna ka saari karaa fadhiga maalintaas ilaa 3 fadhi oo kale.

4. Haddii buuqa xildhibaanku isu bedelo hanjabaad iyo gacan qaad Gudoomiyuhu wuxuu joojinayaa fadhiga, wuxuuna muddaynayaa fadhiga maalinta xigta ee shaqo.

5. Fadhiga dambe Guddoomiyuhu wuxuu awood u leeyahay inuu soo jeediyo in xildhibaankaas laga joojiyo fadhiyada ilaa 10 fadhi (maalmood), taasoo ay tahay in laga ansaxinayo Golaha Shacabka KMG ah, cod hal dheeri ah, xubnaha fadhiya.

6. Haddii gefka uu galay xildhibaanku uu yahay mid aad u culus waxaa loo gudbinayaa arrintiisa Guddiga Hubinta iyo Anshaxa si ay Golaha ugu soo jeediyaan talaabadda ku haboon in laga qaado xildhibaankaas.

QOD. 25AAD:

XURMAYNTA FADHIYADA GUDOONKA

IYO SHARAFTA XUBNAHA:

1. Xildhibaan kasta waxaa waajib ku ah in uu dhawro ama xurmeeyo nidaamka fadhiga, gudoonka iyo sharafta xubnaha Golaha.

2. Xildhibaan kasta oo ka leexda waajibaadka ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan wuxuu mutaysan karaa.

   b) Digniin af ah.

   t) Digniin qoraal ah, waxaa la siinayaa qofkii horay loo siiyay

   digniin af ah.

   j) Ka joojin xildhibaanka fadhiyada ilaa toban fadhi (maalmood).

   x) Talaabada afaraad waxa ay noqonaysaa in loo gudbiyo gudiga hubinta iyo anshaxa, si ay Golaha Shacabka KMG ah ugu soo jeediyaan in laga qaado talaabada ku haboon.

QOD. 26AAD:

XAQA HADAL QAADASHADA

XILDHIBAANKA.

1. Xildhibaan kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka hadlo fadhiyada ama doodaha Golaha kadib markuu is qoro, guddoonkuna siiyo hadalka.

2. Xildhibaanku wuxuu hadli karaa waqti aan ka badnayn 30 daqiiqo, hadduusan Gudoomiyuhu cayimin waqti ka duwan muddaas, hadii hadalka laga gooyo Xildhibaanku kuma soo celin karo isla mawduucii fadhiyada dambe.

3. Xildhibaanku kama hadli karo arrin ku saabsan isla mawduuc wax ka badan hal mar, marka laga reebo ku noqoshada arrin isaga shaqsi ahaan u khuseysa ama la xiriirta xeer-hoosaadka ama caddayn arrin uusan horay uga hadlin, kuna saabsan isla mawduuca laga hadlayo.

4. Xildhibaankii loo soo jeediyo digniin laba jeer, isagoo ka baxay mawduucii doodu khusaysay darteed, ama ku dhamayn waaya hadalkiisa waqtiga ku xusan faqrada labaad ee isla qodobkan, Guddoomiyuhu wuxuu ka joojin karaa hadalka.

QOD.27AAD:

TOOSIN (POINT OF ORDER):

1. Xildhibaan kasta wuxuu codsan karaa toosin (Point of order), isagoon hadalka lahayn ama uu xildhibaan kale wato hadalka.

2. Gudoomiyuhu wuxuu siinayaa haddalka Xildhibaanka codsaday toosinta, hadday la haboonaato.

3. Marka la siiyo hadalka xildhibaanka codsaday wax toosinta, waxaa laga rabaa in uu si toos ah u abbaaro ujeeddada, si koobanna u tilmaamo arrinta uu u codsaday toosinta, xildhibaanaku kama hadali karo wax ka baxsan nuxurka toosinta .

QOD. 28AAD:

LABISKA IYO HAYBADDA XILDHIBAANKA:

Waxaa ka reeban xildhibaanka Golaha Shacabka KMG ah Federaalka ah ee KMG, inuu Golaha ku yimaado muuqaal aan ku habooneen haybadiisa sida dhar qaadashada xun iyo muuuqaal ka baxsan anshaxa.

QOD. 29AAD:

KAMAQNAANSHADA FADHIYADA GOLAHA:

1. Xildhibaan kasta waxaa waajib ku ah in uu soo xaadiro fadhiyada Golaha.

2. Xildhibaankii fasax ama cudurdaar la'aan ka maqnaada fadhiyada 7 maalmood shaqo oo isku xiga wuxuu mutaysan karaa digniin qoraal ah , hadduu misana cudurdaar la'aan maqnaado muddo gaaraysa ,14 cisho xiriir ah ama teel teel ah 30 cisho guduhood, waxaa lagu ganaaxi karaa ilaa (1/5) gunno bileedkiisa , wixii maqnaasho ah ee ka badan muddadaas waxaa loo gudbinayaa Guddiga hubinta iyo anshaxa.

3. Haddii xildhibaanku soo xaadiro bilowga fadhiga, ka dibna iska baxo fasax la'aan iyadoo fadhigii weli socdo waxa uu la mid noqanyaa mid maqan oo kale.

QOD. 30AAD:

SOO JEEDIMO (MOTIONS):

1. Waxaa jiri kara soo jeedinno (motions) Golaha loo soo gudbin karo kuwaasoo ay koox xildhibaano ahi keeni karto.

2. Soo jeedintu waa in ay sharciga waafaqsan tahay, xubanaha soo gudbin karaa waa inaysan ka yarayn 20 xildhibaan.

3. Soo jeedintu waa in ay qoraal tahay lana soo gaarsiiyaa Guddoomiyaha, ugu yaraan hal saac ka hor fadhiga Golaha.

4. Guddoomiyuhu wuxuu usoo bandhigayaa soo jeedinta Golaha, haddii aysan soo jeedintu ka hor imaanayn Axdiga, sharuucda dalka ama xeer hoosaadka Golaha kadibna wuxuu ogolaanayaa in laga doodo.

5. Haddii qoraalka soo jeedinta, ay ku jiraan ereyo wax u dhimaya Golaha, wada shaqaynta xubnaha wuxuu ka codsanayaa soo jeediyayaasha in ay erayada soo jeedinta wax ka beddelaan ama kuwa turxaanta leh ka saaraan qoraalka hase yeeshee haday diidaan inay beddelaan ereyada wax dhimaalka ah, laga doodi mayo soo jeedintooda.

6. Haddii ay muuqato in soo jeedintu aysan waafaqsanayn,Axdiga ama sharuucda ama xeer hoosaadka Golaha loo, qaybin maayo Golaha lagana doodi maayo soo jeedinta .

7. Intii aan laga doodin soo jeedinta, qof ka mid ah kooxda keentay soo jeedinta ayaa ka caddaynaya Golaha hortiisa ujeedada soo jeedinta.

8. Soo jeedintii (motion) ku saabasan wax ka badelidda Axdiga Qaranka waxaa loo raacayaa sida ku xusan Qodobka 70 faqrada 2aad ee Axdiga

QOD. 31AAD:

CODSI, BAARIS IYO SU'AALO:

1. Haddii uu xildhibaan doonayo codsi, baaris ama su'aalo ku saabsan howlaha xukuumada waa inuu Guddoomiyaha soo gaarsiiyaa iyadoo qoraal ah.

2. Ka dib marka Guddoomiyaha Goluhu ka hor akhriyo Golaha Shacabka KMG ah codsiga baarista , waa inuu u gudbiyaa su'aalaha wasriirka ay khusaysu arrintu.

3. Wasiirka ay khusayso arrintu waxaa waajib ku noqonaya inuu jawaab qoraal ah u soo gudbiyo xildhibaanka muddo aan ka badnayn 20 maalmood, oo ka bilaabanaysa maalinta loo gudbiyey qoraalka.

4. Haddii uu xildhibaanku ku qanci waayo caddaynta wasiirka, wuxuu dib u keeni karaa Su'aalahii wuxuuna waydiisan karaa in wasiirku uga jawaab celiyo Golaha Shacabka KMG ah hortiisa. Haddii uu xildhibaanku ku qanci waayo jawaabta uu wasiirku ka bixiyay Golaha Shacabka KMG ah hortiisa, xildhibaanka ama xildhibaano kale ayaa soo cusboonaysiin kara Su'aalahii laftoodii.

QOD. 32AAD:

HUBINTA JOOGITAANKA XUBNAHA,

AJANDOOYINKA IYO MAXDARKA FADHIYADA

1. Fadhi kasta waa in lagu furaa magaca Eebe iyo Aayado Quraanka Kariimka ah.

2. Xoghayntu waxay qoraysaa tiradda iyo magacyadda Xildhibaanada, mawduuca laga hadlayo iyo go'aanada, waxaana hadal qoraalka laga qoray fadhi kasta wada saxiixaya Guddoomiyaha iyo Xoghayaha shaqada maalintaas wada.

3. Goluhu wuxuu meel marinayaa todobaad kasta maalinta uga dambaysa Maxdarkii todobaadkaas, iyadoo cod la'aan lagu ansaxinayo haddii aanay jirin xubin wax ka qabta. Markii loo baahdo cod waxaa codkaasi noqonayaa mid gacan taag ah, oo hal dheeri ah xubnaha codeeyey.

4. Maxdarka Golaha (Minites) waxaa ka hadli kara xildhibaankii raba inuu wax ka saxo keliya.

5. Goluhu wuxuu xaq u leeyahay in fadhiyadiisa qarsoodiga ah aan laga samaynin wax qoraal ah.

6. Hubinta xubnaha soo xaadiray fadhiga, waxaa mas'uul ka ah Gudoomiyaha iyo Xoghayaha shaqada wada, haddiise ay dhacdo in shaki ka yimaado tirada la sheegay, ugu yaraan 7 xildhibaan waxay codsan karaan in tirada lagu hubiyo magac u yeerid xildhibaanada jooga.

7. Haddii xildhibaanada jooga fadhiga ka yaraadaan Guntanka(Quorum) fadhiga waxaa fadhiga dib loogu dhigayaa muddo hal saac ah, kadibna haddii la waayo tiradii Guntanmka (Quorum) waxaa fadhiga dib loogu dhigayaa maalinta xigta ee shaqo.

QOD.33AAD:

HAWEENKA XILDHIBAANADA AH MUDADA

AY KU JIRAAN FASAXA UMMUSHA:

1. Muddada Haweenka xildhibaanada ah ay ku jiraan fasaxa ummusha, waxay xaq u leeyihiin in la gaarsiiyo dukumintiga la xiriira hawlaha Golaha Shacabka KMG ah iyo go'aanada uu soo saaro Goluhu, fadhiyada caadiga ah iyo fadhiyada aan caadiga ahaynba , bishiiba hal mar.

2. wixii la xiriira fasaxa ummusha iyo mudadiisa waxaa la waa fajinaya xeerka shaqaalaha dolwadda.

QOD.34AAD:

KALSOONI-SIINTA XUKUUMADDA:

1. Xukuumadda oo ka kooban Wasiirka 1aad, Ku Xigeenadiisa, Wasiirada, Ku Xigeenadooda Barnaamijka ay ku shaqayn doonto oo qoran iyo qaab dhismeedkeeda waa in la horkeeno Golaha Golaha Shacabka KMG ah, lana waydiisto cod kalsooni ah 30 cisho gudahood, laga bilaabo maalinta la magacaabay wasiirka 1aad. Golaha Golaha Shacabka KMG ah wuxuu go'aankiisa kalsooni siinta xukuumadda ku meel marinayaa codayn Qarsoodi ah iyo aqlabiyad cod hal dheeri ah tirada xubnaha Golaha.

2. Xukuumadu waxay Golaha Shacabka KMG ah waydiisan kartaa cod kalsooni ah goor kasta ooy u baahato.

3. Haddii ay xukuumadu waydo codka kalsoonida ah ee Golaha Shacabka KMG ah waa dhacaysaa, Madaxweynuhuna wuxuu soo magacaabayaa Wasiir 1aad muddo 30 cisho gudahood ah, kaasoo soo dhisaya xukuumad cusub oo la soo hor dhigayo Golaha Shacabka KMG ah, waxaana lagu codaynayaa isla habka ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan.

4. Wasiirka 1aad iyo Golihiisa Wasiiradda waxay dhaaranayaan marka Golaha Shacabka Federaaliga KMG ah siiyo Codka kalsoonida sida ku cad Qodobka 49aad ee Axdiga Qarameedka Federaaliga KMG ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed

QOD. 35AAD:

SOO JEEDINTA KALSOONI

KA-QAADIDA XUKUUMADDA:

1. Soo jeedinta kalsoonidarrada xukuumadda waxaa iyaddoo sababaysan keeni kara ugu yaraan 20 Xildhibaan, waxaana doodeedu furmaysaa 5 maalmood ka dib oo maalmo shaqo ah, kana bilaabanaysa maalinta soo jeedinta la keenay.

2. Codka kalsooni darrada xukuumada ee ka dambeeya soo jeedinta wuxuu noqonayaa mid Qarsoodi ah, wuxuuna ku ansaxayaa aqlabiyad ah kala bar tirada xubnaha Golaha oo lagu daray hal (50% + 1).

3. Fadhiga Golaha oo Ajendadiisu yahay kalsooni ka qaaddista xukuumadda waa in ay soo xaadiraan ugu yaraan (2/3) Xubanaha Golaha ku waasoo ah 184 Xubnood.

QOD. 36AAD:

SOO JEEDINTA KALSOONI

DARRO OO GOLUHU DIIDAY:

Haddii soo jeedin kalsooni darro oo Xukuumadda lid ku ah ay ka heli waydo Golaha Shacabka KMG ah codkii ay ku ansaxi lahayd, lama soo celin karo soo jeedintaas kalsooni darro, ilaa ay ka gudbayso muddo lix bilood ah.

QOD. 37AAD:

MUSHARAXNIMADA MADAXWEYNAHA KMG

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYEED:

1. musharax kasta ee isu soo taaga Doorashada Madaxweynimada waa inuu bixiyo Laba Kun oo Doolar (2000 US$), ama sarifkeeda oo Shiling Soomaali ah haddii Doorashada lagu qabanayo waddanka Gudihiisa.

2. Lacagtaas iyadda ahi waxay noqonaysaa kharash diiwaan gelineed, fulinta hawlaha doorashada ,gundhig dakhli dhaqaale oo uu yeesho Golaha Shacabka KMG ah Federaalka ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed.

3. Doorashada iyo Shuruuda kale ee doorashada Madaxweyninimada waxaa nidaaminaya qodobka (40 iyo 41) ee Axdiga Qaranka

QOD. 38AAD:

DOODA HINDISEYAASHA SHARCI

(LAW DESIGNING DEBATE)

1. Barlamaanku kama doodi karo hindiseyaasha sharciyeed haddii aan loo qaybin xildhibaanada 24 saac ka hor, marka laga reebo xaaladaha degdega ah.

2. Madaxweynaha Jamhuuriyadda ama Wasiirka 1aad ee xukuumaddu, waxay qoraal sababaysan oo ku saabsan xaaladda degdega ah (State of Emergency) u soo gudbin karaan Golaha Shacabka KMG ah si uu uga doodo.

3. Go'aanka arrintaas waxaa Goluhu ku gaari karaa aqlabiyad cod hal dheeri ah ee tirada guud ee xubnaha Golaha Shacabka KMG ah (50%+1=139).

4. Barlamaanku kama doodi karo, go'aana kama gaari karo Hindiseyaasha sharciyeed ama Barnaamij kale oo aan ku qornayn ajendada fadhigiisa markii laga reebo ajendayaasha ku yimaada sida deg deg ah.

5. Haddii dood Hindise sharciyeed loo galo qodob qodob, cod bixintiisuna waxay noqonaysaa qodob qodob.

QOD. 39AAD:

BEDDELKA HINDISEYAASHA SHARCI:

1. Qodobada beddel lagu samaynayo waa in la soo gaarsiiyo Guddoomiyaha 24 saacadood dooda ka hor, iyadaoo qoraal ah, oo ay soo saxeexeen ugu yaraan 20 xidhibaan, hayeeshee haddii beddelaad lagu sameeyo hindise sharciyeed waa in loo keeno Gudooniyaha hal saac fadhiga ka hor.

2. Dooda qodobada wax laga baddeli rabo ee hindise sharciyeed waxaa loo dhigi karaa fadhiga ku xiga, haddii ay ugu yaraan waydiistaan 10 xildhibaan, oo aan midkoodna ahayn kuwii soo jeediyay hindisaha sharciyeed ama xubin ka mid ah Guddiga joogtada ah ee Goluhu u xilsaaray arrimahaas.

3. Sida ku xusan faqradda aan soo dhaafnay, waxaa lagu dhaqayaa xubnaha ka tirsan guddiga dhaqaalaha ama maaliyadda haddii qodob la baddelayo ay , si toos ah ama si dadban u taabanayaan kordhinta kharashka ama dhimista dhaqaalaha.

4. Haddii xildhibaan aan ka tirsanayn Guddiga oo u xilsaaran hindise sharciyeed yimaado ,waa kala qayb qaadan karaa dooda Guddiga uu khuseeyo Hindise sharciyeedku isaga oon cod lahayn.

5. Beddelka hindise sharciyeed ee la horkeeno Golaha Shacabka KMG ah waxaa loo qaybinayaa xubnaha Golaha Shacabka KMG ah isagoo qoraal ah, haddii xildhibaankii soo jeediyay bedelka ka tanaasulo, waxaa mar kale soo jeedin kara wax ka bedelka Xildhibaan kasta oo kale.

6. Hindise sharciyeed uu Barlamaanku diiday mar labaad laguma soo celin karo, golaha haddii aysan ka soo wareegin lix bilood.

QOD. 40AAD:

NOOCYADDA COD BIXINTA

(TYPES OF THE VOTING):

1. Cod bixintu waxay u kala baxdaa sida soo socata:-
   b) Codbixin qarsoodi ah.
   j) Codbixin gacan taag ah.
2. Codbixinta Qarsoodiga ah waxay u dhacaysaa habkan:-
   b) Guddoomiyahu wuxuu diyaarinayaa sanduuqa cod-bixinta.
   t) Wuxuu fasirayaa nooca codbixinta.
   j) Wuxuu amrayaa xaadarinta xildhibaanadda iyo in loo qaybiyo xildhibaanadda waraaqaha cod-bixinta.
   x. Codbixinta qarsoodiga ah, Guddomiyaha Golaha ayaa xaqiijinaya tirada xildhibaanada codka bixiyay, codka khasaaray ama aan la bixinin.
3. Haddii 13 Xubnood oo ka mid ah Golaha ama wax ka badan ay soo jeediyaan in cod bixin gacan tag laga dhigo Qarsoodi waxaa mudnaanta la siinayaa codsiga Qarsoodiga ah.

4. Hindiseyaasha Sharciyada cod bixintoodu waa qarsoodi.

5. Codbixinta kale ee caadiga ah dhamaanteed waa gacan taag.

6. Codaynta la xiriirta wax ka baddelka Axdi Qarramaeedka (charter Ammendments) waa qarsoodi.

7. Xildhibaanadda ka aamusa Codbixinta waxay taagayaan gacanta marka ku aadan, haddii cod bixintu tahay gacan taag.

8. Xildhibaanadda jooga fadhiga hase yeeshee aan ka qayb gelin codbixinta. waxaa lagu tarinayaa kuwa ka aamusay.

9. Cidna looma ogola inuu hadalka qaato ilaa natiijadda codbixinta laga caddeynayo.

10. Haddii la arko qaladaad habka codbixinta qarsoodiga ah, ama ay muuqato codbixin ka badan xildhibaanada jooga fadhiga ama ka yar, Guddoomiyhu wuxuu baa'binayaa natiijada codbixinta waxaana si deg deg ah loogu noqonayaa cod bixin cusub, natiijo kasta oo cobixineed Guddoomiyaha ayaa ku dhawaaqaya isagoo caddaynaya: " tirada ogolaatay , tirada diiday iyo tirada ka aamustay iyo tirade xumaatay.

QOD. 41AAD:

DHAMAADKA MUDDADA GOLAHA

SHACABKA KMG AH :

Mudadda Golaha Shacabka KMG ah waxay dhammaanaysaa markay Maxakamadda Sare ee Jamhuuriyaddu ansixiso doorashada xigta ee Golaha Shacabka KMG ah cusub, sida ku xusan Qodobka 32/2 ee Axdiga Qaranka.

QOD. 42AAD:

MADDAXWEYNAHA IYO

GOLAHA SHACABKA KMG AH:

Maddaxweynaha KMG ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed wuxuu haddal ka jeedin karaa Golaha Shacabka KMG ah munaasabadaha soo socda: -

b) Furitaanka kalfadhiga 1aad ee Golaha ama kalfadhiga 2aad .

t) Xilli kasta oo loo baahdo, Madaxweynuhu waa ka jeedin karaa khudbo Golaha Shacabka KMG ah.

j) Madaxweynaha waxaa ka reeban ka qaybgalka fadhiyada caadiga ah ee Golaha Shacabka KMG ah.

QOD. 43AAD:

AJENDADA HAWL- MAALMEEDKA

GOLAHA SHACABKA KMG AH:-

Ajendada Hawl-maalmeedka Golaha waxaa soo diyaarinaya xoghaynta Golaha, iyadoo ka amar qaadanaysa Guddoomiyaha ama ku xigeenadiisa (1aad /2aad)

QOD. 44AAD:

HAWLAHA KALFADHIYADDA:

1. Fadhi kasta markii la akhriyo Aayadaha Qur'aanka Kariimka ah , waxaa hawshu ku soconaysaa sida ajendaha lagu diyaariyey.

   b) Mudnaanta 1aad waxaa leh qodobadda aan Ajendaha ku jirin sida, Dhaarin xildhibaan cusub , soo jeedinta Guddoomiyaha, Qoraalada soo gaaray Golaha, Codsiyada Iwm. Ogaysiinta soo jeedinada (Motions).

   t) Jawaabihii kasoo noqday su'aalihii la waydiiyay Xukuumadda.

2. Intaas ka dib waxaa la bilaabayaa qodobadda ajendada sida ay u kala horeeyaan haddii aan Guddoomiyaha Goluhu si kale u soo jeedin.

QOD. 45 AAD

ISTAAGGA IYO HABKA

FADHIGA EE GOLAHA:

1. Waxaa waajib ah in xildhibaanadu is taagaan markii uu fadhiga Golaha ay soo galaan shaqisiyaadka soo socoda:

   b) Guddoomiyaha Golahu ama kuxigeenka haya xilka Guddoomiyaha.

   t) Madaxwaynaha KMG ee Jamhuuriyadda Soomaliyeed.

   j) Madaxwayne ajanabi ah oo marti ah ama cid matalaysa.

2. Marka la fadhiyo Golaha waxaa Xubnaha Golaha Hortooda fadhiisanaya Gudoomiyaha oo ay labada dhinac ka fadhiyaan Gudoomiye ku xigeennadiisa, iyo ciddii kale ee guddoomiyaha fadhigu u ogolaado. Habdhooraha, Ku Xigeenadiisa, iyo Xoghayayaashu waxay fadhiisanayaan meel ka hooseysa halka Guddoomiyuhu fadhigu fadhiyo. Xubnaha Xukuumadu waxay fadhiisanayaan dhanka bidix ee ka soo horjeedka Gudoomiyaha fadhigu.

QOD. 46 AAD

HOWL WADEENADA GOLAHA:

1. Gudoomiyaha Golaha Shacabka Federaalka ee KMG ah wuxuu magacaabayaa, xilkana ka qaadi karaa Agaasimaha guud ee maamulka Golaha.

2. Agaasimaha Guud ee maamulku wuxuu hoos imaanayaa Gudoomiyaha waxuuna masuul uga yahay habsami u socodka maamulka Golaha, .xilka iyo masuuliyadda Agaasimaha guud ee maamamulka waxaa qeexaya xeer gaar ah.

3. Magcaabidda ,mushaharka ,gunnada ,howl gabka, dalacsiinta, casilaadda iyo ruqsaynta howl wadeennadda waxaa qeexaya isla xeerka ku xusan faqrada koowaad ee qodonkan.

QOD. 47AAD

DHAQAN GALKA XEER HOOSAADKA:

Xeer hoosaadkani wuxuu dhaqan galayaa markuu ogolaado Golaha Shacabka KMG ah ee Jamhuuriyadda Soomaaliyeed.